

Dowladda Soomaaliyeed ee Puntland Wasaaradda Qorsheynta, Horumarinta Dhaqaalaha iyo Iskaashiga Caalamiga ah Waaxda Tirokoobka Puntland



TUSAHA SICIRKA ADEEGGA DAMBIISHA

JUUN 2021

Warbixinta Tusaha Sicirka Adeegga Dambiisha ee Bisha Juun, 2021

Muunadda dambiisha adeegga qoysaska Puntland waxay ka koobantahay **387** shey oo isugujira **12**-ka qeybood ee hanaanka caalamiga ah ee kala soocidda adeegyada iyo badeecadaha iyadoo loo-eegayo ujeedo isticmaalka badeecad walba. Dambiishaan ayaa loo isticmaalaa lasocoshada iyo xisaabinta isbeddelka qiimaha maciishada.

Shaqaalaha Waaxda Istaatistikada Dawladda Puntland ayaa xogta sicirka mid kasta oo kamid ah 387-daan shey kazoo urruriyaan suuqyada dhammaan magaaloyinka waaweyn ee Puntland siasbuucle ah.


Dhaqdhaqaaqa Billaha ee Tusaha Sicirka Adeegga Dambiisha

Tusaha Guud ee Sicirka Adeegga Dambiisha Suuqyada Puntland (TSD) ayaa intii lagu gudajiray bishii Juun 2021 kor ugasoo kacay 88.85 gaarayna 89.25. Isbedelka billaha ah ee Juun ayaa ayaa la mid ahaa isbedelka bishii ka horeysay ee Maajo 2021, taasoo uu jiray korar dhan 0.49 boqolkiiba.

Qeybaha badeecadaha ee sicirkoodu bishii Juun sida xoogan ukacay marka loo eego qeybaha kale ayaa kala ah: badeecadaha Makhaayadaha iyo huteelada(6.61%), Badeecadaha iskujirka ah (2.73%), Gaadiidka iyo Adeegga Socdaalka (0.77%), Tubaakada (0.49%), Caafimaadka (0.28%), Cuntada Iyo Cabitaanada(0.26%).

Isbedel togan ayaa ku dhacay sicirka badeecadaha qeybahooda kala duwan, inkastoo uusan isbedel xog leh ku keenin Jiitimaad ku sugnaanshaha Jaantuuska dhaq-dhaqaaqa tusaha guud ee sicirka adeegga dambiisha sida hoos ka muuqata.


Jaantuuska 1aad: Jaantuusyada Heerka Sicir Bararka Iyo Dhaqdhaqaaqa Tusaha Guud Ee Sicirka Dambiisha Bisha Juun, 2021.



Jadwalka 1aad: Heerka Sicir bararka billaha ah ee Juun 2021 (2015=100)

Tusaha Sicirka Dambiisha, Juun 2021	
Tusaha (bishaan) = Juun 2021	89.29
Tusaha (bishiihore) = Maajo 2021	88.85
Tusaha (Maajo, Sanadkiihore) = Juun 2020	88.31
Isbedelka % billaha ah = Maajo 2021 / Juun 2021	0.49
Isbedelka % sanadlaha ah (heerkasicirbararka) = Juun 2020 / Juun 2021	1.11

Jaantuuska 2aad: TSD, Isbedelka Billaha Ah ee Qeybaha Damiisha



Qaybaha is-bedelka uga badan ee dhanka Togan Ku Yimid Bisha Juun 2021

- **Sicirka Makhaayadaha iyo Huteelada:** ayaa waxaa ku yimid kor u kac dhan (6.61%) intii lagu gudajiray bishii tagtay ee Juun 2021, halka bishii ka horeysay ee Maajo 2021 la diiwaangaliyey qiima korar dhan (0.00%). Sicir kororka qeybtaan ee bishii Juun ayaa waxaa sababay sicirka qiimaha Cuntada oo kacay (7.37%).
- **Sicirka Badeecadaha isku jirka ah:** ayaa waxaa ku yimid kor u kac dhan (2.73%) intii lagu gudajiray bishii dhamatay ee Juun 2021, halka bishii ka horeysay ee Maajo la-diiwangaliyey qiima korar dhan (0.08%). Isbedelka bisha Juun waxaa keenay qiima kac kuyimid sicirka daryeelka iyo isqurxinta shaqsiga (3.39%).
- **Gaadiidka iyo Adeegga Socdaalka:** sicirka badeecadaha qeybtaan ayaa waxaa ku yimid sare u kac dhan (0.77%) intii lagu gudajiray bishii Juun 2021, halka bishii ka horaysay ee Maajo 2021 uu jiray sicir barar dhan (0.24%). Isbedelka qeybtaan ee bishii Juun waxaa keenay sara ukac kuyimi adeegga safarka (7.45%).
- **Tubaakada Iyo Jaadka** sicirkooda ayaa itii lagu gudajiray bishii dhamaatay ee Juun 2021 iyana waxaa ku yimid sare u kac u dhigma (0.49%), halka bishii ka horaysay ee Maajo la dawiingaliyay qiimo dhac dhan (-

2.65%). Sicir-bararka qeybtaan ee bishii Juun intiisa ugu badan waxaa sababay Tubaakada (3.34%).

- **Caafimaadka:** sicirkiisa ayaa itii lagu gudajiray bishii dhamaatay ee Juun 2021 waxaa ku yimid sicir barar u dhigma (0.28%), halka bishii ka horayasay ee Maajo aysan qeybtaan waajihin wax sicir barar ah (0.00%). Balse, qiima korarka jiray bishii Juun ee qeybtaan intiisa ugu badan waxaa sababay Qalabka caafimaadka (0.66%).
- **Cuntada Iyo Cabitaanadda:** sicirkooda ayaa waxaa ku yimid kor u kac dhan (0.26%) intii lagu gudajiray bishii dhamatay ee Juun 2021, halka bishii ka horeysay ee Maajo ladiiwangaliyey sicir korar dhan (0.59%). Isbedelka bisha Juun waxaa keenay qiima korar kuyimid sicirka cabitaanada(1.59%).

Tusaha Sicirka Dambiisha: Qaybo Si Gaar Ah Loo Eegay, Juun2021

Cuntada Iyo Cabitaanada, KiradaGuryaha, Adeegyada, Biyaha, Korontada, iyo Gaaska ayaa celcelis ahaan hadda ah qaybaha ugu muhiimsan dambiisha Addegga, maadama ay saamiga ugu badan ka yihiin kharashaadka qoysaska, tan ayaa ka dhigaysa qeybaha inaysameynta ugu badan kuyeestaan isbedelka Tusaha guud ee Sicirka Dambiisha Sida aynu kor kuso sheegnay,


Cuntada Iyo Cabitaanadda sicirkooda ayaa kor u kacay (0.26%) bishii dhammaatay ee Juun 2021, halka bishii ka horeysay ee Maajo la diiwangaliyey sicir barar dhan (0.59%). Qaybta cuntada iyo cabitaanada ayaa 12kii billood ee ku dhamaanayey Juun 2021 waxaa ku yimid hoos u dhac sanadle ah oo u dhigma (0.64 %) marka loo eego sicir jabkii sanad dhammaadkii ama 12kii billood ee ku idlaanayey Maajo 2021 oo gaarayey hoos u dhac dhan (0.73 %).

Jadwalka 2aad: Isbedelka Billaha ah ee qeybaha ugu muhiimsan Cunta da (Maajo2021 ilaa Juun 2021)

Magacashayga	Abril	Maajo	Juun
CuntadaiyoCabitaanada	1.08	0.59	0.26
Cuntada	1.08	0.62	0.20
Rootiga, Bariisaka, Burka iyobadarka	0.81	0.15	-0.12
Sonkorta	0.80	0.00	0.00
Hilibkanoocyadaxoolaha	-0.62	0.12	0.89
Kalluunka	0.00	0.00	0.00
Caanahaliiska ah iyokalluunka	0.94	1.13	-0.51
Saliidaiyoashyaadadufankaleh	2.11	-0.56	4.47
Miro BeeraadkasidaCambaha&Muuska	1.33	-0.06	0.04
KhudaartaCagaaran	3.02	2.60	-0.82

Dhanka kale, **Kirada Guryaha, Biyaha, Korantada iyo Gaaska** ayaa sicirkoodu hoos u dhacay (0.03 %) bishii dhammaatay ee Juun 2021 marka loo-barbardhigo bishii Maajo oo la diiwaan-galiyey qiimo koror dhan (0.17 %). Sicirka sanadlaha ah ee qeybtaan ayaa 12kii billood ee ku xirmayey Juun 2021 waxaa ku yimid hoos u dhac gaaraya (0.46%).

Jaantuuska 3aad: TSD Guud Iyo Qeybo Si Gaar Ah Loo Eegay



Source: Puntland Statistics Department


Dhaqdhaqaaqa Sanadlaha ee Tusaha Sicirka Dambiisha ee Sanad Dhamaadka Juun2021

Isbedelka sanadlaha ah ee heerka sicirbararka 12kii billood ee u dhexeeyey billihii Juun 2020 iyo Juun 2021 ayaa ahaa koror dhan 1.11 boqolkiiba, halka sanad dhammaadkii ku ku xirmayey Juun 2021 la diiwaangaliyay sicirkoror dhan (0.85%).

Qaybaha badeecadaha ee sicirkoodu sida xoogan u siyaaday 12-kii billood ee u dhexeeyay Juun 2020 ilaa Juun 2021 ayaa kala ahaa: -Caafimaadka (11.43%), Gaadiidka iyo Adeega socdaalka (10.17%), Maqakhaayadaha iyo huteelada (8.61%),Badeecadaha iskujirka ah (7.99%), Agabka qurxinta iyo qalabeynta Aqallada (4.53%), Dharka (4.01%).

Dhanka kale waxaa hoos u dhac ku yimid qaybahan hoose: -Tubaakada Iyo qaadka (-3.27%), Dhaqanka iyo madadaalada (-2.23%). Guud ahaan sicir koror ayaa ku dhacay Tusaha Adeega Sicirka Dambiisha.

TSD: Jaantuuska 4aad; Sicir-bararka sanadlaha ah ee qeybaha badeecadaha iyadoo loo eegayo hanaanka caalamiga ah ee kala soocidda badeecadaha; Juun2021.



Qeybaha Isbeddelka Togan ku dhacay Sanadkii ay u dambaysay bisha Juun 2021

- Caafimaadka:** Sicirka qalabka iyo adeegga caafimaadka ayaa intii u dhaxeysay Juun 2020 ilaa Juun 2021 waxaa ku yimid kor u kac sanadle ah oo dhan (11.43%), halka sanadkii ka horeyeey ee ku dhamaanayey bishii Maajo 2021 la diiwaangaliyey sicir-barar sanadle ah oo gaarayey (12.91%). Sicir-bararka sanadlaha ah ee bisha Juun waxaa sababay sicirka qiimaha adeegga cusbitaalada oo kordhay (11.98%) iyo qalabka caafimaadka oo kordhay (11.41%).
- Gaadiidka iyo Adeegga Socdaalka** ayaa waxaa ku yimid kor u kac sanadle ah oo dhan (10.17%) intii lagu gudajiray sanadkii ku dhamaanayey bisha Juun 2021, halka bishii Sanadkii ku xirmayey bishii kasi horeysay ee Maajo ladiiwaangaliyey sicir-barar dhan (10.70%). Isbeddelka sanadlaha ah ee sanadkii ku idlaaday bishii Juun waxaa keenay qiime korar ku yimid sicirka adeegga safarka (10.65%) iyo hawlgalka qalabka gaadiidka gaarka ah (10.01%).
- Makhaayadaha iyo Huteelada:** ayaa sicirkodu intii lagu gudajiray sanadkii ku dhamaaday bishii Juun 2021 kor u kacay (8.61%) marka loo eego sanadkii ku xirmayey bishii ka horaysay ee Maajo 2021 oo la diiwaangaliyay qiimo korar dhan (2.13%). Sicir bararka sanadkii ku dhamaaday bishii Juuna waaxaa u sababa sara ukaca ku yimid adeegga jikada oo gaarayey (9.61%).
- Badeecadaha iskujirka ah** ayaa intii lagu gudajiray sanadkii ku idlaaday bishii Juun 2021 wuxuu kor u kacay (7.99%), marka loo eego sanadkii dhamaanayey bishii ka horaysay ee Maajo 2021 oo la diiwaangaliyay sicir korar dhan (5.45%), waaxaanna u sabab ahaa adeegga xaragada oo sicorkiisu kordhay (24.46%).


- **Agabka Qurxinta, qalabeynta iyo dayactirka Aqallada** ayaa intii lagudajiray sanadkii ku xirmayey bishii Juun 2021 sicirkooda waxaa ku yimid qiime korar gaaraya (4.53%), halka sanadkii ku dhamaaday bishii kasi horaysay ee Maajo 2021 la diiwaan galiyay sciir barar u dhigma (4.58%). Sicir kaca kaca ku yimi badeecadaha iyo adeegyada qeybtaan intii lagu jiray sanadkii ku idlaanayey Juun waxaa loo sababaynayaa agabka guryaha oo sicirkoodu kacay (11.91%) iyo daahyada guryaha oo Iyana ku yimid sicir kac gaaraya (9.27%).
- **Dharka iyo kabaha:** ayaa intii lagu gudajiray sanadkii ku dhamaaday bishii Juun 2021 sicirkooda waxaa ku yimid koror gaaraya (4.01%), marka loo eego sanadkii ka horeyyey ee ku idlaanayey bishii Maajo 2021 oo la diiwaangaliyay sicir korar dhan (2.79%), waaxaana u sababa ahaa sara bararkii jiray sanadkii ku idlaaday Juuna sicirka gabaha oo sare u kacay in u dhiganta (8.11%).
- **Qeybaha Isbeddelka Taban ku dhacay Sanadkii ay u dambaysay bisha Juun 2021**
- **Tubaakada Iyo Jaadka** ayaa waajahay sicir jab gaaraya (-3.27%) intii lagu guda jiray sanadkii ku idlaadya bishii Juune ee 2021, halka sanadkii ku xirmayey Maajo 2021 uu jiray hoos dhac dhan (-2.26%). Hoose u dhaca sanadkan dambe intiisa ugu badan ayaa ka yimid Jaadka oo qiimahiisu dhacay (-15.45%).
- **Badeecadaha Dhaqanka iyo madadaalada:** sicirka badeecadaha dhaqanka iyo madadaalada ayaa hoos u dhacay (-2.23%) intii lagu gudajiray sanadkii ku xirmayey bishii Juun 2021, halka sanadkii ku dhamaanayey bishii ka horeysay ee Maajo la diiwangaliyey qiimo dhac dhan (-2.43%). Sicir jabka badeecadaha dhaqanka iyo madadaalada ku yimid intii lagu guda jiray sanadkii ku xirmayey bishii Juun waxaa keenay sicirka qalabka dhaqanka oo hoos u dhacay (-4.35%), iyo kan adeegga dhaqanka iyo madadaalada oo hoos u dhacay (-4.45%).

Tusaha Sicirka Adeegga Dambiisha: Sookoobidda dhaq-dhaqaaqa iyo Dhibco ku biirinta Miisaanka Dambiisha

Jadwalka3: Tirooyinka ugu muhiimsan dhaq-dhaqaaqyada Maajo 2021 (Index = 100 at 2015)

COICOP Classification Group	Jun-20	May-21	Jun-21	May-21 to Jun-21 (monthly)	Jun-20 to Jun-21 (annual)
	Index	Index	Index	% change	% change
TSD ee dhaman qaybaha badeecadaha	88.31	88.85	89.29	0.49	1.11
Cuntada iyo Cabitaanada	85.64	84.87	85.09	0.26	-0.64
Tubaakada iyo Jaadka	101.11	97.33	97.81	0.49	-3.27
Dharka iyo Kabaha	93.90	97.69	97.67	-0.02	4.01
Kirada guryaha, Biyaha, korontada, Gaaska iyo Shadaalda kale	87.30	86.33	86.30	-0.03	-1.15
Agabka guryaha iyo Dacdirka	88.56	92.50	92.58	0.08	4.53
Caafiimaadka	85.74	95.26	95.53	0.28	11.43
Gaadiidka	92.57	101.21	101.99	0.77	10.17
Isgaarsiinta	87.62	87.62	87.62	0.00	0.00
Dhaqanka iyo Madadaalada	102.55	100.26	100.26	0.00	-2.23
Waxbarashada	90.70	90.61	90.61	0.00	-0.10
Maqaaxiyaha iyo Huteelada	87.27	88.90	94.78	6.61	8.61
Badeecadaha iyo Adeegyada isku jirka ah	119.20	125.31	128.73	2.73	7.99

Jaantuuska 5aad: SidaqaybahaDambiishu ay Dhibcaha ugu biiriyaanTusahaGuud iyadaoo la eegayo miisaanka Qeyb waliba leedahay



Source: Puntland Statistics Department

FG: Saameynt ay qaybkastaookamid ah qeybaha uu kakoobanyahay hanaanka kala soocida badeecadaha ay kuyeelanayso isbedelka Tusaha guud ee Sicirka Adeegga Dambiisha waxay kuxiirantahay hadba saami culeyska ay qeybwalba ka tahay culeys dhismeedka Guud.